

OGEYSIIS KU SAABSAN ARRIMAHA AASKA

Xaaladda koroonaha ee lagu jiro awgeed ayaa isbitaallada ku yaalla caasimadda iyo nawaaxigeeda, waxaa ay xarumahooda ka joojiyeen ku dhiqistii maydka. Tilmaanbixinta cusub ee isbitaallada dhankooda ka imaanaysa ayaa sheegeysa, in marka qofku dhinto durabdiiba lagu diyaarinayo isla qaybta uu ku jiray gudaheeda dhimashadiisa kaddib. Wax biyo ah laguma dhiqi karo, hal qof oo ehelka maydka ah ama qof kale oo muslim ah (haddii uusan ehel lahayn) ayaa loo oggol yahay in uu waaxda isbitaalka yimaado si uu u diyaariyo qofka dhintay. Dadka ehelka meydka ah ayaa laga doonayaa in ay ka taxaddaraan u diyaarinta meydka sida aan kor ku soo sheegnay. Haddii qofka meydka ah aan lagu diyaarin waaxda dhexdeeda, islamarka uu dhinto kaddiba, xafiiska qubuuruhu waxaa ay meydka toos u geynayaan xabaalaha iyadoo aan la dhiqin.

Qofka u dhinta cudurka koroonaha meydkiisa lama dhaqaayo, waxaana meydka la gelinayaa bacda loogu talagalay meydka, taasoo aan la furi karin, waxaana si toos ah loogu ridaayaa sanqduuqa. Bacdaas meydka ayaa u galaysa booskii kafanta.

TILMAANBIXIN KU SAABSAN QAABKA LOO DIYAARINAYO MEYDKA (AAN U DHIMAN CUDURKA KORONAHA) INTA LAGU GUDAJIRO XAALADDA AAN CAADIGA AHAYN

1. Waxaad ka taxaddartaa arrinka ah in qofka meydka ah aad jirkiisa qariso inta ay hawsha diyaarintu socoto oo dhan.
2. Haddii ay qofka meydka ah ku xiran yihiin sillinge, sharootto, cirbad iwm waxaa laga bixinayaa kahor inta aan diyaarinta lagu bilaabin. Haddii meydka jirkiisa ay ku taal wasakh muuqata (dhiig, saxaro iwm) waxaa looga nadiifin karaa maro yar oo qoyan
3. Waxaa meydka inta hoose ee jirkiisa lagu nadiifin karaa maro yar oo qoyan, laakiin kahor arrinkaas waa in wixii saxaro iyo la mid ah ee caloosha ku haray si tartiib ah looga soo saaro, kor ayaa loo soo qaadayaa inta sare ee meydka, sidii iyadoo la soo fariisinayo oo kale, dabadeedna gacanta aya si fudud caloosha loogu riixayaa, waana in markaa meydka ay u xiran tahay xafaayad. Kaddib haddii wax wasakh ah ay ka soo baxan, waxaa lagu nadiifinayaa maro yar oo qoyan.
4. Markii hoos laga nadiifiyo kaddib, qofka meydka ah waxaa loogu gabagabaynayaa (booraysi, ama tayamum) ciidda, gacmahaaga ayaad ciidda saaraysaa, kadibna waxaad ka marinaysaa wajiga , waxaadna ku xijinaysaa gacmaha qofka meydka ah.
5. Intaa kaddib waxaa qofka meydka ah la gelinayaa kafantii, waana arrin dhib badan in uu halqof kaligiis kafanta geliyo qofka meydka ah, laakiin waa suurtaggal arrinkaas.

Qofka meydka ah marka la gelinaayo sanduuqa waxaa loo dhigayaa dhinaca midigta, wajiguna waa in uu midigta xigaa. Ka codso xafiiska qubuuraha in aad la joogi karto meydka marka sanduuqa lagu ridaayo. Haddii aan arrinkaas suurtaggal ahayn, adiga u sheeg xafiiska qubuuraha qaabka meydka sanduuqa loo gelinaayo. Una sheeg in aan saduuqa lagu xiraynin boolasha ah calaamadda kiristaanka.

Haddii aadan wax khibrad ah u lahayn arrinka ku saabsan dhaqista meydka, waxaad caawimaad weydiisan kartaa dadka khibrada u leh arrinkaas.

Faahfaahin dheeraad ah kala soo xiriir : tel 044 325 4255 www.islamilainenhautaus.info